

CAAFIMAADKA

Ku caawimeysa dhibbanayaasha colaada hubeysan iyo masiibooyinka iyadoo u hagaajineysa helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

ISBITAAL GACAN KA GEYSANAYA XAKAMEYNTA DAACUUN KA DILAACAY BAYDHABO



Xoghayaha SRCS laanta Baydhabo Xusseen Daahir (bidix) oo shir ka dhacay Isbitaal Goboleedka Baydhabo xog ku siinaya mutadawiciinta. Kulamadan xog siinta ah ayaa ah halka mutadawiciinta looga xilsaaro doorarkooda iyo mas'uuliyadooda

Isbitaal Goboleedka Baydhabo waxaa dhowaan la soo gaarsiiyay in ka badan 220 bukaan oo la ildaran cudurka dilaaga ah ee daacuun caloolaha. Todobo qof ayaa u geeriyootay xanuunka tan iyo markii xaaladii ugu horeysay la xaqiijiyay bilowgii Disember ee 2015. Inkastoo dad badan u soo ritay cudurka, Isbitaalka wuu awooday inuu la tacaalo xaalada, iyadoo ay ugu wacan tahay tajeerada Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS).

Iyadoo ay korortay tirada bukaanda la keenay bishii Disember 2015, awooda isbitaalka ayaa noqotay mid kala taag ah, ICRC-duna waxay bixisay sahay dawo ah isla markaana ku caawintay dhisida teendho laagu talagalay in lagu sooco dadka ugu baahan daryeel gaar ah.

"Waxaan arkay bukaano da'doodu u yartahay ilaa iyo wiil shan jir ah oo ay keentay hooyadiis, Fadumo, oo si aayar ah u soo fiicnaanaya, hooyadiisuna ay ku rajo weyn tahay inuu fiicnaado" sida waxaa yiri Mohamed Aydurus, oo ka mid ah seddex iyo tobón mutadawaciin oo ay Bisha Cas howgalisay si ay wax ugu qabtaan baahida shaqaalaha ee Isbitaalka Baydhabo.

"Hadda wiilkeyge qatar kuma jiro, taxadir ayaan sameynayaa sida karkarinta biyaha iyo nadiifinta deegaanka ku hareereysan gurigayga" sidaa waxaa tiri Faadumo oo deggan Baydhabo. Bukaana ku dhacay xanuunka daacuunka badankood waxay ku nool yihiin Baydhabo halka qaar ay yihiin dad barakacayaal ah oo ka yimid daafaha magaalada.

Odayaasha deegaanka iyo hogaamiyaasha diinta ayaa waxax gacan ka geysteen wacyigelinta bulshada ee baahida fayodhowr wanaagsan si looga hortago cudurka dilaacay.

"Waxaan bilownay inaan tabarno mutadawaciinta Ururka Bisha Cas (SRCS) si ay u


sameeyaan wacyigelin fayadhowrka heer qoys ahaan," sidaa waxaa yiri Maurizio Campailla oo mas'uul ah ka ah isku dabaridka barnaamijyada caafimaadka ee ICRCda Soomaaliya.

Sida uu yiri Maurizio, ICRC waxay sidoo kale dhaqangelisay tababar loo fidiyay shaqaalaha isbitaalka sidaa darteed way awoodi karaan inay la tacaalaan xilliyada xaaladaha deg degga ah.

Dhammaadkii bisha Jannaayo 2016 inta badan bukaanka waa laga saarey isbitaalka, waxaana ku soo haray lix keliya.

Labaduba ICRC iyo SRCS waxay si dhow ula socdaan xaalada Baydhabo haddii cudurkan faafa dib u soo noqonaya

ICRC waxay joogtay gobolka Baay iyo gaar ahaan Baydhabo halkaas ay ku taageereysay waaxda qalinka ee Isbitaal goboleedka Baydhabo tan iyo 2014tii iyo xarunta lagu xanaaneeyo caruurta nafaqadarada hayso tan iyo 2015tii. Xarunta xanaanada deg degga ah ee carruurta nafaqadareysan ayaa carruurta ku daryeesha barnaamijka quudinta dheeriga ilaa iyo ay ka gaaraan culayska ugu wacan.



Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo www.blogs.icrc.org/somalia/so

Email: sok_somaliblog_services@icrc.org